# Gardarro garab og

**W/Q Cawaale Xuseen**
**Email:awalle@gmail.com**
**May 5, 2021**

---

Uurjeex waa uu qudhbaxay, Good ayaana lagu sababay. Good naftiisu in kasta oo uu kibir iyo sannahaabo badnaa hadda waa sirinsirqo. Birre waa la samirsiin la' yahay. Dhiiggii Uurjeex inta aanu engegin inuu mid kale daadiyo ayuu geed dheer iyo mid gaabanba u fuulay. Dhamac samokatalis ayuu ahaa, haatanse waxa uu u eg yahay caalwaa colaad diyaar u ah. Waxgarad iyo waayeelba waa la isu qaylodhaansaday. Waxaa la isla gartay inay lama huraan tahay in arrinta laga salgaadho, xalse lama helin maxaa yeelay dareen isdiidmo iyo nacayb ayaa degmadii hadheeyey. Xaajadu hagaag iyo heshiisba waa ay diidday, waxa ayna u baahatay rag-ka-rooni, maan af leh, talo midaysan, guurti iyo guddoon dhexdhexaad ah.

Haddiise intaaba la helo, sidee ayaa loo heshiisiin karaa gardarro garab og oo koolkoolin iyo gadaafo kusoo caanomaashay iyo geylame[1] gafdiid ah?

Jiilaal hawaarsaday ayey qeyro balaadhan oo reer miyi ahi soo dul degtay ceel doomanaysan[2] oo ka mid ah ceelasha tolka. Oon kulul oo dhurduhu dhegaha ku meero ayaa jira. Xareed, balli iyo baraag biyeysan xilligoodii lama joogo, sidaa awgeed dad iyo duunyaba ceelkaa ayaa laga cabbaa oo meel kale oo biyo laga helo ma jirto.

---

[1] Geylan: halgan; geylame: halgamaa.

[2] Doomanaysan; doomanayn: ceelasha biyaha ayaa loo isticmaalaa. Ceelku waa dawr ama waa uu doomanaysan yahay. Waa uu doomanaysan yahay markii uu yahay ceel irmaan oo laga cabbo. Waa dawr haddii uu biyo leeyahay laakiin aan muddo laga cabbin oo ay xashiish iyo xaab badan ku daateen. Waxa uu u baahan yahay in la xaadho, la karkaareeyo ama xidhay loo sameeyo dabadeed la harqiyo oo biyihii qudhmay laga bixiyo. Dawr ayuu ahaa saa waa in la doomaneeyo.




Talada qeyradu dhawr nin ayey kusoo ururtaa. Kuwaa waxaa ka mid ah Dhamac Coldiid. Dhamac waa waayo-arag. Waayo-aragnimadiisu mid muran ku jirta ma aha. Waa nin guyaal badan tirsaday. Ha tirsadee, laga-roone cimriyey oo madaxiisu cirro mooyee aanu caqli lahayn ma aha. Waa khibradle soojiraanimadiisu aanay madhnayn.

Dhamac aabehii iyo awowgiiba waxa ay ahaayeen labo suldaan oo mid waliba xilligiisii tolka soo hoggaamiyey. Labadooduba waxa ay leeyihiin taariikho, gabayo iyo murti mahadho leh oo degaanka si baahsan ugu faafay. Suldaankii aabehii ahaa kolkii uu geeriyooday ayaa isaga oo xabaashiisii la qodayo waxaa soo maray wadaad dariiqo ah oo xer wata. "Waryaa dhintay oo aad aasaysaan?" ayuu su'aalay. Waxa ay ugu jawaabeen "suldaan hebel Alle ha u naxariisto". Kolkaa ayuu rundudsaday[3] oo ashahaatay. Oo haddana ashahaatay. "War gurigood ba', dadka ha u sheegina yaan la idin boobin e. Waxaad tidhaahdaan habar ayaannu aasaynaa." Dhamac aabehii waxa uu ahaa nin tolka udub dhexaad u ah. In kasta oo geerida aabehii ka dib walaalkii ka weyn saldanadii reerka lagu aaminay, Dhamac qudhiisu waxa uu ahaa nin taliya oo burji leh, hadalka xaalufiya, Ilaahay hibo iyo haybad siiyey oo aan cadkiisa cidi hawaysanin.

Xagga muuqaalka Dhamac waa nin xoog iyo itaal Alle isagu daray oo ilqabad leh. Labo dhoollood oo is weydaarsan ayaan weligii usoo bixin. Hooyadii kol la waraystay waxa ay sheegtay Dhamac inuu ciidda cuni jiray xilliggii uu gurguurad iyo socodbaradka ahaa.

[3] Rundud: madaxa oo hoos loo foorariyo murugo ama ciil dartii.

*Geel labo jir soo wada maryee*, Dhamac naftiisa mar la waraystay isaga oo aad u cimriyey waxa uu sheegay wiilka wiilashiisa u weyn oo Birre la yidhaahdo inuu dabka cuni jiray xilliggaa isaga ah.

Dhamac waxa uu ka soo taliyey ama iyada oo ninqar kale ka talinayso goobjoog ahaa sanado badan. Sanadahaasi waxa ay isagu jireen aaran, abaar, colaad iyo nabadgalyo. Geedka raggu fadhiisto marka uu ka sheekaynayo waxa uu carrabka ku dhuftaa gu'yaal barwaaqo ahaa sida Dixiriile, Gobaysane, Siigo Case, Xays Balaayo, iwm. Ujeedkiisu waa in dhulku barwaaqo ahaan jiray, dadkuna aanay galladaha Ilaahay ku kibrin.[4] Kolka uu abaaraha iyo sanadaha xumaaday ka warramayo waxa uu hadalka mariyaa Madaxyo Kulmay, Jiif Weyn, Gaatama, Sii Foorara, Kab Dubad, Gibil Xoor, iwm. Allebari, roobdoon iyo duco ayuu beeshiisa fari jiray.

Dhinaca kale Dhamac waxaa lagu yaqaanay rogrogidda talada iyo go'aan qaadasho ku dhisan waxa tolka dan u ah, dariska *ood ama ab wadaagga* la yahayna aan xadgudub ku ahayn. Waa uu go'aan adkaa laakiin macangag, maro-ku-dheg ah ma ahayn. Waxa uu adeegsan jiray odhaahyo kooban oo ka tarjumaya talo wanaagiisa iyo tayada shaqsiyaddiisa. Waxa uu odhan jiray "anigu haddii aan idhi Alle ma odhanin." "Cadho sokeeye waa la bariiyaa." Sokeeye waxaa isaga u ahaa Soomaali oo dhan. Sidaa oo kale waxa uu caan ku ahaa "dantaada iyo madaxaaga midna lagama boodo e, sidaa iyo sidaa ma yeellaa?" Aan yeelo, amar-ku-taaglayn iyo isbidid midna ma aha ee waa ma yeellaa. Nin aan kaligii taliye ahayn, meel aan dadku aad wax uga arkin ka arka, garta sakal walba ka bixiya, taladana jirridda dhab siiya ayuu ahaa.

Markii uu dhallinyarada ahaa Dhamac waxa uu ku jiray ragga cududda u ah tolka. Hoggaamiye aan ishiisa mudac marin laakiin gardarada, gafka iyo eexda neceb ayuu ahaa. Waxa uu odhan jiray *labo ceebood taada ayaa la jirtaa* oo annagu dad sharaf iyo magac leh ayaanu nahay. Dhawr iyo labaatan fac ayuu abtirkiisa dib u tirin jiray illaa uu gaadhsiiyo oday kore oo ay Soomaali badani aaminsan tahay in ay galaan, odaygaa oo ay Nebi Maxamed (NNKHA) isku soo dhacaan. Hase yeeshee waxaa gaar ku ahaa Dhamac oo uu aaminsanaa in qabaa'ilka Soomaaliyeed ee haatan jira badankoodu yihiin gaashaanbuur ee aanay dhalyo isku raacin. Soomaalidu waa isku asal waana dad isir la yaqaanno ku aroora, laakiin tololka hadda jira danta iyo duruufaha degaanka ayaa isku qasbay ayuu ku doodi jiray. Waxa uu aad u dhibsan jiray haybsooca iyo isirxulka.

Dhamac guud ahaan iyo gaar ahaanba waxa uu ahaa nin aan wanaagiisa laga gayoonaynin, laakiin waxaa lagu xamanjiray inuu faalka dhigo. Inta aanu talada goynin ayuu dhulka xarriiqaa oo uu faalka la tashadaa ayey odhan jireen. Isna waxa uu isku difaaci jiray inuu faalka yaqaano laakiin aanu faaliye ahayn. Faalka waan dhigaa, faaliyase ma ahi waxaa loo fahmay kuma shaqaysto, dadkana waxba kuma yeelo ee danahayga gaarka ah ayaan ku fushadaa.

[4] Waa kii Maxamed Cumar Dage (AUN) isaga oo dadka wacdinaya lahaa: "Waxa lagu gataatacahayaa saw gu' da'ay ma aha; Galladaha Ilaahay maxaa gabay abaalkooda; Gaardigan iyo danbigu saw gurracan ma aha."

**Xilliga**

Milaygu waa intii aan weli saancaddaagu geyiga Soomaaliyeed iman. Ingiriis, Faranji iyo Talyaani midna ma soo degin. Gumaysiga dubka madow ee uu kaa hore baardaajiyeyna haba sheegin. Xabashiyi dhulka oogada ah ee xaggeeda xiga kama soo dhaadhicin. Soomaaliyi waa mid. Shan (5) ma aha. Maya, toban (10)[5] ma aha.

Waa xilli gumaysigu aanu weli sarrifin saldanooyinkii soojireenka ahaa ee Soomaalida oo ay beeshu is ogoshahay. Nin karmeedka ayaa taliya. Ninba ninka uu ka dagaalyahansan yahay, ka hufanyahay, ka karti badan yahay kana aftahansan yahay ayaa reerka hoggaamiya. Oday, ugaas, suldaan, boqor, garaad, iimaan, malaaq, wabar ama magac kale ha sheegtee gumaysiga hoos gabdaaniya[6] ma jiro, maxaa yeelay gumaysiba weli ma iman. Iimaanlaawe shisheeyaha dabagableeya, beenaale, jaajuus, diradiraale iyo tuug midna aad looma arko, haddii la arkana sidii *tuke cambaar leh* ayaa loola yaabaa.

Sidaa oo kale waa xilli siyaasi Soomaaliyeed oo deriska u dusa iyo mid dowlad shisheeye u gurguurta aanu jirin. Hebel dowlad hebla ayaa wadata sidaa awgeed isaga ayaa doorashada soo socota ee faragalinta shisheeye iyo 4.5ta ku jaango'an ku guulaysan doona warkeedba daa. Musharax dariska gaadhgaadha, huteel la seexiyo dabadeed aniga i dhisa wax walbana waan idiin ogolaan yidhaahda Soomaalida weli kama soo dhexbixin, saa cidiba isma sharraxdo. Shisheeye-kalkaal cadowgu ku garwaalaysto iyo madax maddiiddaysan midna ma jirto. Kuwo hawl yaraan dhargay oo qurbaha kasoo noqday, waajibkii guryahooda iyo carruurtooda ka saarraa dayacay, oo kursi doon ah, laakiin wax macno iyo manfac ah oo ay bulshada u leeyihiin aanu jirin lama arko. Run ahaantii erayga "qurbajoog" weli af Soomaaliga kuma soo biirin.

Waa xilli ninka Soomaaliga ahi uu aad isula weynyahay, islaweyni aan kibir iyo santaag ahayn ee isku kalsooni ah. Sidii uu ku sifeeyey Cabdi Qaadir Xirsi Yamyam (AUN) kolkii uu mariyey heestiisii ahayd "Soomaali baan ahay" weeye xaalka Soomaalidu.

- Sinnaantaan la magac ahay
- Sanku-neefle ma ogoli
- Inuu iga sarrayn karo
- Sida dunida qaarkeed
- Sandullaynta ma ogoli
- Ninna kabaha uma sido…
- Dareen seexda ma lihiyo
- Saan la kala jaraan ahay
- Summaddii ay ku wada taal.

---

[5] Shantii hore ee uu gumaysigu Soomaalida u qeybiyey iyo Puntland, Galmudug, Hirshabeelle, Koonfur Galbeed iyo Jubbaland. Sool iyo Sanaag ama Khaatumo iyo Banaadirlandna waa ay soo dhaardhaaranayaan.

[6] Hoos gabdaaniya: daba socda, u dabadhilifeeya ama ag manuusa.

Dhaqan aan weli la tarraxin oo aan Soomaalinimada gees uga bixin, haddii uu hoos u degana jilbaha Soomaaliyeed dhexmeeraysta ayey bulshadu leedahay. Tolal iyagu mararka qaarkood isu daran, shisheeyahase iska celiya oo ka faana ayaa degaanka sariiran. Midhihii xumaa ee uu gumaysigu shiniyeeyey ee Soomaali kala reebay weli ma soo bixin. Kuwaasi waa kuwii uu ka digay waddanigii Soomaaliyeed ee yidhi:

- Good iyo abeesaa is baddalay garanse maysaane[7]
- Garangoorri[8] bay nagu hadhiyo mici gamaareeye[9]
- Kaaral[10] nagama guurine halkii buu guud madow yahaye.

Duuduub ahaan, xilligii Dhamac uu xoogga ahaa dhaqanka dadku waxa uu ahaa mid suubban oo xeer la yidhaahdo Xeersan la isku maamulo.

**Xeerka**

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu Dhamac sheekeeyey, isaga oo leh:

Waxaa jiri jiray xeer la yidhaahdo Xeersan. Xeerkaa xilliggii dhidibada loo aasay mugdi ayaa ku jira, waxayse taariikhyahanadu u badan yihiin in qarnigii 13aad dhammaadkiisii si kamadambays ah loo ansixiyey. Waxaa lagu sameeyey meel u dhexaysa Badhan iyo Xadeed oo Nugaasha Soomaaliya ah. Xeersan waxa uu ahaa xeer iyo sharci uu isku maamuli jiray tol ka mid ah tololka Soomaaliyeed ee degaankaa xilliggaa ku noolaa. Dejinta xeerkani waxa ay qaadatay muddo ku dhow saddex sano. Marka la dejiyey waxaa beesha boqor u ahaa garaad da'yar, nindoorse ahaa, magacana isaga ayaa bixiyey.

Xeersan qaabka iyo nidaamka loo sameeyey waxa uu ahaa mid si habsami ah looga baaraandegay, taasina waxa ay keentay in qaanuunkiisu sidii la rabay u hirgalo. Garaadka iyo guurtidii reerka ee la talin jirtay ayaa waxa ay go'aansadeen in beesha laga soo xulo 27 curad oo xeerbeegti ah, xeerkuna inuu yeesho 27 qodob oo mid waliba afar laamood ka kooban yahay. Laan waliba waxa ay leedahay afar farac, farac walibana tirfacyo ka sii baxay ayuu leeyahay. Tusaale, 27ka qodob waxaa ka mid ahaa afartan hoose:

1. Wax dhacay oo afku diido;
2. Wax dhacay oo afku sheegi karo;
3. Wax aan waligii dhicin, dhicise kara; iyo
4. Waxtar waxyeeloobay.

[7] Gabayga meerisyadaasi ku jiraan waxa aan ka maqlay Cabdullaahi-dhoodaan bishii Juun 2009, Diridhaba. Ninka tiriyey magaciisa ma aanu haynin.

[8] Garangoorri: shilin weyn oo xoolaha dhib badan u geysata.

[9] Gamaarey: nooc shilinta ka mid ah, dub adag iyo qaniiyo halis ah leh.

[10] Kaaral: magac labeed dadka dubcaddaaga ahi ay la baxaan. Karl ama Carl. Karl Marx ku garo. Waxaase uu ujeedaa gumaysigii saancaddaaga ahaa oo dhan.

Dhamac isaga oo hadalkii sii wata ayaa waxa uu yidhi:

*Wax dhacay oo afku diido* waxaa lagu xallinjiray oo qofka danbigan gala lagu qaadi jiray ciqaabta astaanteedu tahay *xinjiro-fajaas* iyada oo la eegayo xaaladda qoyska uu kasoo jeedo. Haddii raaska danbiiluhu aanu ka maarmin xag ciidan ahaan waxaa laga saari jiray xiniinta bidix si aanu u dhalin. Haddii loo arko in qoyskiisu ka maarmi karo ciidan ahaan, waa *xinjiro-fajaas* oo waa la qisaasayaa, waxaana la isu marin jiray dhawr waran.

*Wixii dhaca ee afku sheegi karo* waxaa lagu xallinjiray hadal sida:

1. Waano;
2. Canaan;
3. Yake, maraade ama ganaax;
4. Sharafayn;
5. Cambaarayn; iwm.

*Waxaan waligii dhicin, dhicise kara* waxa uu ahaa qodob ku dhisan ka hortag iyo u tooghayn buuxda. In Xeersan uu sii male-awaalo xumaan kasta oo tolka kala dili karta iyo sidii loo xallin lahaa xumaantaasi haddii ay dhacdo ayaa aasaas u ahaa qodobkan. Sida summadiisaba ku cad, ma lahayn tixraac hore oo lagu saleeyo ama laga qiyaas qaato. Waa xaajo ugub ah, ayuu Dhamac sii raaciyey.

*Waxtar waxyeeloobay* waa ficil ujeedadiisii hore fiicnayd xumaanise ka dhalatay oo in laysku dilo ama lagu kala dhinto dhalin kara. Kaasina wuxuu lahaa xalal u gaar ah.

Laamaha qodobada 27ka ah ee Xeersan hoosyimaadda waxaa ka mid ahaa *afarta aafo dhale* oo kala ah:

1. Eexda;
2. Tuugada;
3. Beenta; iyo
4. Dhilaysiga.

Afartaa laamood ee *aafo-dhalayaalku* u kala baxeen ciqaabtoodu waa ay kala cuslayd waxaana loo xallin jiray siyaabo kala duwan.

Dhamac waxa uu hadalkiisii ku daray inuu aaminsan yahay in Xeersan iyo diinta Islaamku ay is waafaqeen marka laga reebo dhawr qodob sida guurka iyo dhaxalka.

Halkaa isaga oo sheekada marinaya ayey dhinac qeyrada ka mid ah qaylo ka soo yeedhay. Odayaashii iyo raggii uu Dhamac u sheekaynayey fadhigii waa ay ka kaceen waxa aanay u dhaqaaqeen dhinacii qayladu ka jirtay. Sheekadii wacnayd ee uu Dhamac waday halkaa ayey ku istaagtay.

**Faal iyo diin**[11]

Xilligu sidaa kore ha ahaado, xeerkuna haba samaado e, maalin ka mid ah maalmihii uu Dhamac xoogga ahaa, intii aanu weli halganka ku biirin, ayey qeyradiisii col duntay. Isaga qudhiisa ayaa lagu kallifay inuu colka hoggaamiyo. Isaga oo cagajiid ah, meel uu ku hadho iyo wax uu u baxo oo duullaan u dumo midna aan garaynin ayuu fiid horaadkii colkii la dhaqaaqay. Waxa ay sii gudaanba oogta hore iyada oo aan weli libdhadu soo bixin, mudutuulse la arki karo, gabaddano[12] xunna ay dhacayso ayey iyaga oo daal la ildaran meel fadhiisteen.

Guure iyo daal dartood in aan raggu sidan dagaal ku gali karin ee uu yara nasto ayey isla garteen. Kolkii raggii kale daatay ayuu Dhamac kor u baxay sidii qof soo xaajo gudanaya. Markii uu colkii ka qarsoomay ayuu fadhiistay. Xaajo kale oo uu u soo baydhay ma jirine faal ayuu dhigay. Faalkii waxa uu u sheegay colkiisa iyo kii ay usoo qasdeen in ay gorodda isgalin doonaan, kiisuna guulaysan doono. Haddana waa uu dhigay. Saa qoodhe-madoobe ayaa yaalla. Waa uu ku celiyey. Waxa uu sheegay ninkii colkiisa ka mid ah ee maanta diin arka inuu noqondoono ninka ugu horreeya ee dagaalka lagu dilo.

Isaga oo yara faraxsan oo tallaabada boobaya ayuu dib usoo gaddoomay. Waxa uu is lahaa ciidankaaga ka farxi, ugana dig in aan nin qudh ahi diin arkin. Wax Alla wixii xamaarato suureeya ee idiin muuqda indhaha ka laliya aadna waxba ha u dhooroofina inuu faro ayuu qasadkiisu ahaa. Laakiin sidaadii uu uga soo dhaqaaqay goobtii uu faalka dhigayba waxa uu la kulmay filinwaa. Diin hortiisa murduf murduf leh ayuu arkay. Waa uu hubsaday in waxa indhihiisu hayaan uu diin yahay.

Ogaa in aan dhaayehiisu been u sheegaynin. Laabta ayuu ka hadlay. Waxa uu is yidhi faalka jinni maxaa kuu geeyey. Malaha bixiso ayaa ku wadda!

Ragga faalka dhiga inta badan waa ay rumeeyaan waxa faalku u sheego. Waxaaba dhacda in aanay tallaabo qudha qaadin iyaga oo aan faalka la tashan maxaa yeelay waa ay qabatimaan. Mararka qaarkood waxaa la yidhaahdaa ka dhiga qudhiisa ayuu ku noqdaa oo uu ugu dambayn sababaa. Dhamac kal naxda ma lahayn, walbahaar kale ayaase Alle shamax ku siiyey. Colkaagu waa uu guulaysan, adiguse dagaalka ayaad ku dhiman ayuu rumaystay. Adigu haddii aad xag Alle u jihaysato, guusha colkaagu ku naaloodo maxay kuugu taalaa? Saw uun aakhiro kama tihid ayey laabtiisu kula faqday. In tolku libaysto adiguse aad dhimato ma arrin xunbaa? Mase la is barbardhigi karaa in tolku guuldarraysto, rag badan haadda loo loogo iyo in adigu aad noolaato oo aadan dagaalkan ku dhiman? Waxa uu xusuustay meerisyo ku jiray gabaygii guubaabada ahaa ee Cali Oday[13].

- Gadhka xiira gaashaandhig bay gobi u aydaaye

---

[11] Diin: nooc xamaaratada ka mid ah, qolof adag, afar lugood iyo luqun dheer leh oo socod gaaban. Gobolada qaarkood waxaa looga yaqaanaa diindiin.
[12] Gabaddano: dayradhaaf; dhaxan aad u qabow oo dabayl wadata.
[13] Cali Oday (AUN) waxa uu ahaa geesi dagaalyahan ah oo degaanka Dhamac aad looga yaqaano.

- Geerida ha diidina ninkii go'ana yeelkiisa
- War guntada Ilaahbow garnaqa gaal iyo Islaane
- Warmihiina gana goor dhaw bay guushii soo celine.

*Geerida ha diidina ninkii go'ana yeelkiisa,* malaha adiga ayey kugu socotaa ayuu is yidhi. Walaac ayaa saaqay. Soomaalidan bilaashka isku laynaysa ma lagu kala hagoogan karaa ayuu isweydiiyey.

Waxa uu damcay inuu faalkii ku noqdo oo uu mar kale dhigo. Mase hadin. Diinkii ayuu xaggiisii dhugtay. Mise kolkii uu shanqadha Dhamac dareemay ayuu afartii addin iyo qoortiiba ceshaday. Dhagax malaakuusan oo aan cidina waxba yeeli karin ayuu noqday. Alla maxaa qolofta loo saaray, shimbiruhu beri hore ha laasteene ayuu ku hammiyey. Kolkaa ayaa waxa uu xusuustay jiiftadii Singub ee ahayd:

- Diinbaa baylah waa ahaa[14]
- Bannaan hilibkiisu yiil
- Kolkaasaa bahalku u tashaday
- Aan boobnana lagu heshii
- Basaasku warkii u tebi
- Ilaah baryadiisiibaa
- Badbaado gal looga dhigay.

Meel uu wax ka bilaabo ayuu garan waayey. Go' uu garabka ku sitay ayuu diinkii ku daday.

Dhamac waxa uu ku magacdheeraa naanays marka uu faraxsan yahay aanu dhibsanin, markase uu barmarsan yahay uu gudub u jalleeco qofkii ay afkiisa ka soo baxdo. Indho qofka mudaya oo aad mooddo inay ka dusayaan ayuu lahaa. Waxaaba jiray labo illaa saddex nin oo uu faragorgor la helay ka dib markii ay naanaystaa si xushmaddarro ka muuqato ugu yeedheen. Taasi waxa ay ahayd "Waraabe-salaax." Naanaystu waxa ay daarran tahay ninku inuu yahay mid si dhib yar dadka uga dhaadhicin kara ama u marsiin kara wax Alla wixii uu doono isaga oo aftahanimadiisa, dhaqan iyo hadal aqoontiisa cuskanaya. Marba haddii waraabe oo dagaal iyo dabci kulul lagu yaqaano uu rabaayadayn karo, ma dad ay isku af yihiin oo ay isfahmayaan ayuu maskaxdooda irmaanayn waayey?

Dhamac dareen ayaa galay, durbana tallaabo ayuu qaaday. Si dhiilo ku dheehan tahay ayuu raggii ugu yeedhay. Diinkii ayuu go'ii ka qaaday, mise difaacii ayuu weli ku jiraa.

*War waxani muxuu yahay?"*
*Dee waa diin.*
*Ma hubtaan inuu diin yahay?*
*Haa, waanu hubnaaye danta aad leedahay maxay tahay?*

[14] Jiiftadaasi waxa ay ku jirtay riwaayaddii Isuma Qaddo ee uu sameeyey Maxamuud Cabdullaahi Ciise Singub (AUN).

Dhamac kolkaa ayuu waxa uu yidhi "raggu diinka wada arag, colkuna waa celis." Amar ayuu ku bixiyey inay dib u noqdaan duulaankana la joojiyo.

Ragga badankiisu soojeedintaa waa ay aqbaleen ka dib markii ay sheekadii faalka si fiican u dhagaysteen. Waxaase jiray barbaar garmaqaate ah oo arrintaa aad uga gilgishay. Coldoon dhulka ayuu isla dhacay. Dib u noqosho a! Colka ha la celiyo a! War ninku fulaysanaa! Ma waxaad ka cararaysaa geeri xataa adiga oo aqalkaaga raartiisa hurda kuu iman karta? Isaga oo haliilaya oo warankii iyo gaashaankii diyaarsaday ayuu waxa uu soo tuuray meerisyo gabay ah. Waxa ay ahaayeen:

- Kol haddii rasaas laysa la dhaco dhamacdii maadhiinka[15]
- Dhafandhaaf haddii laysku rido hubaan dhammaanaynin
- Ninna dhay ka dhami maayo iyo caanihii Dhebiye
- Wallee dhimasho loo siman haddii laysku dhiidhiyo e
- Nin dhintiyo nimay dhaawacdiyo nimuu Ilaah dhaafsho
- Ninba wuxuu ka dheefaba dagaal waa inuu dhaco e.

Aad ayaa loogu bogay gabaygaa munaasabka ah ee uu Coldoon sida habboon usoo daliishaday.

Gadh-madoobe hongod leh oo afgaabni iyo kani-adayg isku darsaday ayaa isna dhinac u baxay. Geelqaad waxa uu yidhi "wax waliba waxa ay intaa iga yihiin in aan…"

Gobjar oo aan saa uga fogayn ayaa afka dhab siiyey si aanu Geelqaad u xilafurin.

Caydoon ayaa Gobjar dharbaaxo farba meel dhigay.

Loxos ayaa Gobjar garbaduub ka soocay.

Hingil ayaa Loxos judub ku darandooriyey.

Talo dhabaqday. Raggii duulaanka ahaa dhexdooda ayey ka tolatay. Labo saf ayey u kala baxeen. Qamaame, araare, dhaar iyo kalaqabtaay. Dhamacse dhinac ayuu isu taagay oo buuqii ma dhexgalin. Ugu dambayntii, waxa ay noqotay in colku dib u noqdo oo taladii Waraabe-salaax la qaato.

Labo (2) caanomaal ka dib ayey raaskoodii qorrax-ka-soo-bax kasoo galeen. Nin waliba aqalkiisii ayuu gataatidhacay marka laga reebo Geelqaad. Isagu ciil ayuu la gami' waayey. Isaga oo cadho bakhtiisan ayuu aqalkii Dhamac soo beegsaday. Innaba isaga oo aan ka fakarin cidda aqalka ku jirta ayuu dalaq soo yidhi. Waryaa Dhamac. Waa kuma iyo go'a oo uu iska rogo ayuu Dhamacna isku daray. I dhagayso...Waxa aan ku idhi… Gabaygii maalintaa Geelqaad uu mariyey waxaa ka mid ahaa meerisyadan hoose:

[15] Meerisyadaasi waxa ay ku jireen gabay uu tiriyey nin la odhan jiray Cawed Ismaaciil (AUN). Waxa aan kasoo dheegtay gabayo uu habeeyey Cabdi Mire Cali 1984kii aanse buug laga dhigin.

- Iyadoon caarad-dhuub loola iman cadow ku liishaamay[16]
- Cidlaa mawd ka helayaa naftaad la cabsanaysaane
- Dhaaxaa duul aan cidina dilin ciidda hoos maraye
- Caawa inay go'aysiyo inay waayo sii cunayso
- Nin kaloo caddayn kara la waa Caadilkaa garane
- Haddii uu caddaan iyo madow uunku la colloobo
- Calafkiisa oo aan ka madhan dunida coofkeeda
- Halkii loo calaamaday haddii aan cimrigu gaadhin
- Oo aan cirshiga amar ka iman kaama go'a ceeshe
- Calow lama dugsado xaajadii kuugu sugan ceebe
- Cudud iyo adoo xoog leh baad cudur la jiiftaaye
- Caafimaadku wuxuu saaran yahay caaraddii warane
- Mar uun maad cadhootaan rag waa layska celiyaaye.

Dhamac iyo Geelqaad shaah badan ayey fadhigaa ku cabbeen, hadalkiina waa uu la taraaray. Sheekooyinka uu Dhamac xusay waxaa ka mid ahaa dhacdada faalku inay ahayd tu male-awaal ah oo uu isagu sameeyey ee aanay dhab ahayn. Waxa uu yidhi "waxa aan u sameeyey si aan colka u hakiyo, dhiig Muslin oo bilaash ku daatana uga hortago. Beenabuur danbi iga soo gaadhayo ma aha ee waa nabadayn iyo colaad baajin aan ajir iyo abaalmarin ka heli doono." Illeen waa Waraabe-salaax e, Geelqaad madaxiisii ayuu minjo u rogay.

**Doolaalodhaaf**

Sannado badan ka dib, beeshii Dhamac oo berisamaad iyo barwaaqo ku jirta ayaa waxaa kusoo biiray mas weyn oo dool ah oo ah nooca ay Soomaalidu ugu yeedho *good.* Maska qudhiisu waa noole dhandhamo iyo dhuuni ku nool. Biyo ayuu u baahan yahay sidaa awgeed ceelka ayuu ladaabtaa. Laakiin waa garaadlaawe oo ma yaqaano miilaysi, madhaxsi iyo maaxin midna. Weliba biyo doon kaliya ma ahee ceelka guntiisa ayuu deggan yahay oo hoy u ah. Milicdu kolkii ay gubto ayuuba ceelka dabbaashaa oo uu isku qaboojiyaa. Haddii dayr xumaad dhaco ama roobka gu'ga la waayo oo ay biyuhu gabaabsi noqdaan, kurayga ceelka soo dhura looma xidhi karo cabsi maska laga qabo awgeed. Gafarkii agtiisa ku dhaca waa uu dhibsadaa, marar badanna wadaantii oo uu kala gooyey oo aan wax biyo ah wadin ayaa lasoo bixiyaa. Daaqsin badan ayaa dartii looga caagay. Mas gardarro miidhan ah, damac badan, col iyo nabad midna aan oggolayn oo reerka aad u kadeeday ayuu noqday.

Mar haddii Good dadkii dhulka uu ugu yimid uu kaadida ku dhajiyey, Dhamac waxa uu goostay inuu xal raadiyo. Sidani si ma ahee maxaad yeeshaa ayaa laabtiisa kusoo noqnoqotay. Tolkii ayuu abaabulay. Waxa uu hormuud u noqday dhaqdhaqaaq Good lagaga takhalusayo ama isaga iyo wixii la hayb ahba degaanka lagaga saarayo. Koofiyad weyn oo labada dhagood ka lalmata, kolkolna labada nadh ee dhagaha ka korreeya uu ku xannibo ayuu xidhay si uu cadceedda uga

[16] Meerisyadaasi waxa ay ku jireen gabay uu tiriyey nin la odhan jiray Goox Cilmi (AUN). Waxa aan kasoo dheegtay isla ishaa sare.

gaashaanto. Waxaa kale oo uu qaatay siidhi dhuun-geelle ah oo kolkii uu ku dhufto fiintu geedaha ka argagaxdo. Dagaalgaliye dhiirran ayuu ahaaye waxa uu goostay weerar, difaac, gaadmo, rogaalcelin, mir, ku-dhufoo-ka-dhaqaaq iyo barqo-weerar kii ay duruuftu biddaba inuu qaayibo.

Quraanka iyo shareecada Islaamka si fiican ayuu Dhamac u yaqaanaa, raggiisana iyadaa ayuu ku guubaabiyaa. Waxa uu diinta Islaamka kasoo bartay masaajiddii iyo dugsiyadii tayada lahaa ee ku yaalay caasimaddii Soomaaliya, Harar. Waa nin Sunni ah oo aad ugu dheggan mad-habta Shaaficiyada. Aayado quraan ah oo jahaadka ka hadla ayuu goob walba ka akhriyaa. Waxa uu odhan jiray quraanka waxa aan ugu jeclahay suuradda gaashaanbuurta ama Suuratul Axsaab. Dad badan ayaaba Sheekh Wali ugu yeedha iyaga oo diiddan in ay darajada sheekh iyo magaca Dhamac ah isku sidkaan. Kuwaasi waxa ay aaminsanaayeen in ninku garabdaar[17] leeyahay. Waxa ay yidhaahdaan waxyaalo badan oo uu manaam ku arkay ayaa dhab ahaan u dhacay. Riyadana inuu fasiro ayuu isku dayaa, mararna sidii uu u fududeeyey ayey noqotay.

Sheekh waddani ah oo dhiidhiya, Soomaalidana is daaya oo isku tashada ku guubaabiya ayaa tif ka ah dhigaalka Soomaalida. Kuwaa ayuu Dhamac ka mid ahaa. Hayin khasaare-ka-soo-daal ah, guul iyo guuldarro, gar iyo gardarro intaba usoo joogay ayuu ahaa sanadihii noloshiisa u dambeeyey. Waxa uuba u ekaa maktabad lugaynaysa oo hadlaysa. Laakiin wax walba waxaa maanta kala weyn sidii uu Good iyo gardarradiisa uga hoos bixi lahaa.

Ubad badan ayuu Dhamac dhalay. Birre oo ubadkaa ugu weyn ayaa u horreeya ragga uu ku xisaabtamayo. Birre aad ayuu Good ugu malmalcuunsan[18] yahay. In mar uun la kala foodqaado ayuu jeclaa. Waxa uu is yidhi – maskan halista ah ee jabada idinla yaalla ee ceelka reerku ka cabbo dhex jiifa, daaq badan dartii looga caagay, qofkii uu saydhana aanu cifasho lahayn maxaad ka yeeshaa? Birre waxa uu isku qanciyey in aan *col iyo reer meel wada deganaan karin.* Sidaa awgeed hadafka iyo talada aabehii waa inuu hirgaliyaa, Good iyo wixii la halmaalana aan loo kala hadhin.

Good qudhiisu mid dhagar badan ayuu ahaa. Kicin iyo abaabul joogta ah iyo sidii uu ilma Aadan u kala gaabin lahaa, talada degaankana u maroorsan lahaa ayuu ku hawlanaa. Xamaarato oo dhan ayuu hadh iyo hoyba u diiday.

Arrini waxa ay soo dhutisaba, iyada oo la isu cadhaysan yahay dhawr goorna la is farasaaray ayuu kol dambe Good goostay inuu labo (2) arrimood mid yeelo:

1. Inuu reerka jabada yaalla ka dhigo wax uu laayo, caydhiyo ama ku sandulleeyo in ay isaga talada ceelka iyo carshintaba uga dambeeyaan. Waxa uu is yidhi sidaa ayunbaad xasillooni iyo ammaan ku heli kartaa; ama
2. Inuu la heshiiyo *oo oodi ab ka dhaw e*, daris wanaag iyo is qaddarin lagu wada noolaado.

[17] Garabdaar: uurkubaalle; male-awaal iyo garasho dheeraad ah oo uu qofku wax aan weli dhicin saadaaliyo.
[18] Malmalcuunsan: aad u cadhaysan.

Nooluhu inta badan waa dantii yaqaan oo shaygii ay nabadgelyo iyo dhib yaraan ku heli karaan, dagaal iyo buuq kuma raadiyaan. Waxa ay jecelyihiin in ay kala warwareegaan oo aanay is jiidhin haddii mid waliba nolosha intii uu uga baahnaa ka helo. Beesha Good kasoo jeedose waxa ay noolaha kale dheertahay damac waalan oo mararka qaarkood nimcada ay haysato ka kala daadiya. Damacaasi sadbursi iyo kalicun jacayl ayuu salka ku hayaa. Waxaa jirta taloxumo beeshani beelaha kale dheertahay. Duruufaha ku gadaaman noloshuna waa kuwo adag. Ismaandhaafka ka dhasha baadka, biyaha iyo deeqda Alle ee laga helo koonkan lagu nool yahay ayaa soo noqnoqda. Kheyraadka beekhaaminta u baahan iyo biyaha miilaysiga uun ku deeqa ayuu gacan-ka-hadal ka dhashaa. Kolkolna waxaaba jira ilraxan[19] sax ah oo dalba geylan iyo wax iska caabbin. Kii laga gardarraa ama lagu xadgudbay ayaa gilgisha oo guluf kiciya.

Sidaa haba ahaatee, saddex (3) habeen ayuu Good arrintii ku seexday oo uu maskaxda tuujiyey. Talo waxa ay kaga gorortay inuu beesha Dhamac odayga u yahay la heshiiyo. Oo dad sidee ayaa loola heshiiyaa? Sidee ayaase loo afgartaa? Cid hadda ka hor la heshiisay oo aan waraysto xamaarato ma laga helayaa? “Iskuma fayno laakiin dagaal faydo tari maayo” dii Axmed Sheekh Jaamac (AUN) ayuu xusuustay. Xusuus ha joogtee, meeriskaasi si fiican Good uguma duxin. Iyada oo aan cidina noo kala dabqaadin sidee ayaan dad ula heshiiyaa? In aan u taliyo ma ay ogola, aniguna inay ii taliyaan ma ogoli oo aniga ayaaba degaankooda ugu imid oo ku haysta. Aynu wada noolaano oo is nabadgalino ma yeelayaan? Sidee ayaanay u yeelaynin saw iyaga yidhaahda *awowow ku daari maayo ee ha i daarin.* Awowga ay ka hadlayaan miyaanu aniga ahayn, taase beeshayda ma laga helayaa? Buuq iyo islahadal ayaa walaaqay maskaxdiisii awalba itaalka yarayd.

Good damac iyo hummaag is barkan ayuu wax ku dhisay. Sidii uu islahaa waa ay kuu roontahay ayuu sawirtay. Waxa uu istusay isaga iyo Dhamac oo is gacanqaaday. Sida ay la ahayd, haye, hawraarsan iyo is afgarasho aan qornayn laakiin wax madmadow ahi aanu ku jirin ayaa dhacday. Waxa ayba naftiisu ugu sheekaysay iyaga oo laabta isku dhuftay oo kalgacal iyo walaal-walaal cadhadii iyo colaaddii lagu baddalay. Waxa ay heshiiskaa ku sibdhiyeen haddalo dardaaran ah oo ay ka mid ahaayeen “qawl nin weyn ka dhacay waa qolof geed ka dhacday.” “Axdi nimaan adkaynini, aayad ma adkeeyo.” Iyo xaddiis ay af Soomaaliyeeyeen oo ay qayb ahaan duclucdiisu ahayd calaamadaha munaafaqa waxaa ka mid ah haddii la aamino inuu wax khayaano.

Heshiis aan hadda ka hor la arag lana maqal ayaa dhacay. Labo noole oo aan is af iyo falaad aqoon, mid waliba awood u leeyahay inuu ka kale ajalo haddii uu haad ka helo laakiin wada deggan ayey noqdeen.

[19] Ilraxan: aragti buuxda. Cabdullaahi-dhoodaan waa kii gabaygiisa Jilboriiq la baxay ee uu tiriyey 1973kii ku lahaa: “Hayeeshee ilraxankaa sameyn laab riyow timide.”

**Col isu gibillo weyn**

Sida uu ismoodsiiyey Good, sidii heshiisku u dhacayba barwaaqo ayaa la galay, Dhamac iyo reerkiisuna heshiiskaa aad ayey u mahadiyeen oo dad iyo duunyaba waa ay bulaaleen. Sidaa Good haba iska dhaadhiciyo laakiin cabsi iyo dareen joogta ah oo ku qotoma “mas ayaa aamini kara” iyo “dad la iskuma hallayn karo” ayey labada dhinacba qabeen.

Cabsidii iyo dareenkii ayaa dhab noqday. Muddo waxa uu ka warwareegaba, kol dambe ayuu Good go’aan ku gaadhay inuu heshiiskii khayaaliga ahaa ka baxo. Sabab ku xambaartay illaa iyo hadda lama oga laakiin waxa uu goostay inuu reerka ka dhigo wax dhinta, wax dhuma iyo wax dhaanraaca. Waxaa xiskiisa kusoo noqnoqday in ay markii horeba ilduuf siyaasadeed ahayd inuu dad la heshiiyo. Qorshihiisu waa inuu qarsoodi u ahaado si uu gaadmo wax ugu laayo. Damicii waallaa ee aynu kor kusoo xusnay ayaa hoggaamiyey. Kheyraadka dalka inuu isla ekaysiiyo talada degaankana uu faramaroojisto ayuu goostay. Waxa uu iska dhaadhiciyey in aan shan-faroodle lala heshiin karin oo goor ay noqotaba mar uun ay dhagri doonaan.

Hase yeeshee Alle waxa uu dadka noolaha kale kaga duway sarajoogga oo kaliya ma aha. Waxa ugu muhiimsani waa caqliga iyo garashada. In kasta oo aan la aqoon afka nooleyaal badan isku la hadlaan, ilaa hadda inta la og yahay dadka ayaa ugu garaad roon. Sidaa awgeed Birre shaki ayaa ku dhashay. Manuuska badan ee Good ayuu tuhmay. Gudun uu aad u soofeeyey ayuu garabka sudhay. Waxa uu u ekaa nin gartay in Good colaadaysan yahay. Waxaadba moodaysay in ay ka go’an tahay marka ugu horreysa ee uu haad ka helo inuu madaxa garab dhigo. Meelihii Good lagu yaqaanay ayuu Birre cagta ku badiyey, raadkiisa haddii uu arkana waa uu raacay bal inuu isaga oo is yar dhigtay helo. Rag door ah ayuu kasbaday oo diyaar u ah inay Good iyo beeshiisa degaanka ka kiciyaan. Waxaase hubanti ahayd in aan si dhibyar loo gaadi karin mas xidaaraysanaya.

*Rag is guraye*, colaadani yaryaraysi malahee, maalin dambe ayuu Good beeshiisii shiriyey. Waxa uu soo jeediyey in ay caawa Dhamac iyo reerkiisa miraan si ay hadafkoodii u hirgaliyaan. Talo-soojeedintaa si degdeg ah ayaa la isagu raacay iyada oo aan Good u baahanin qancin iyo sababayn dheeri ah midna.

Gabbalkii ayaa dhacay. Xoolihii ayaa la maalay oo waa la seexday. Xamaaratadu bir ma tuman karto, gacanqaadna ma leha ama ma taqaano. Laakiin hub halis ah ayuu Alle ku hubeeyey, kaa oo ah mici iyo mariid. Saq dhexe ayuu Good ceelkii kor uga soo baxay. Waa la ogaa Good inuu yahay mid si fudud u raaca wixii dubaaqiisaa taabta sidaa awgeed cidnaba ma aanu sugin. Ilaalo iyo sahan gaaban ka dib, waxa uu u dhaqaaqay dhinacii Dhamac iyo Birre ay geyrada ka yaaleen. Waxaa ka go’an hal qofna Alle ha ka dhigee inuu cid uun caawa micida la helo. Waxa uu isagu sheekeeyey xataa haddii aadan dad badan laynin, colaad labada beelood isku baabi’isa ayaad kicin kartaa. Gaar ahaan waxa uu ku hanweyn yahay inuu helo Dhamac ama Birre.

Naf teedii gashey ayunbaa dhimatee, Good waxa uu kabbaday muruq-dhardhaar caano geel ka dhargay oo ardaaga laydhsanaya. Uurjeex waxaa ku curtay Birre iyo Xaadsan Dhugad. Dakano gaar ah oo uu Uurjeex qabay ma jirin, ninka reerka laga dilana ma aanu ahayn, waxaase uu noqday *sagaaradii tuuryada la kulantay*.

Dhawaaqii Uurjeex ayey Dhamac, Birre iyo rag kale kusoo kaceen. Laakiin nasiibdarro laguma soo gaadhin. Good waa uu raadgatay isaga oo ku dhuumanaya gudcurka. Isaga oo aan ka warqabin qofka caawa meydbariga ah laakiin ka rajoqaba labadii (2) nin ee uu kusoo talagalay midkood inuu yahay ayuu ceelka guntiisa kasoo raamsaday.

Waagu kolkii uu baryey ayaa maydkii duleedka reerka lagu aasay. La garay falkan waxshinimada ah waxa geystay inuu Good yahay. Waa la sii kala aamin baxay. Reerkii amnigii iyo xasiloonidii ayaa ka dhumay, Goodna meel uu bogga dhigo oo aan ceelka guntiisa ahayn ayuu waayey. Cidhiidhi ayey labaduba galeen. Dhul weynihii ayaa qaaba-qowsayn ku noqday, noloshiina macnihii iyo raaxadii ayaa ka tagey mar haddii aanay nabadgalyo jirin.

Beeshii Dhamac abaabul muuqda ayaa ka dhex bilowday. Dhamac hoggaaminta guud iyo abla-ablaynta talada ayuu ku mashquulay. Rag xoog ah oo aad u hanjabaya ayaa geed kabdhoodka ah fadhiista barqo walba xooluhu kolkii ay dareeraan. Midkoodna meel laga saro ma laha. Talo ayaa la gudboon, colka ay is hayaanse ma aha mid ay falaadkiisa yaqaanaan. Biyodhaca faqoodu waa: rag sida la isaga celiyo Alle waa na baraye, mas sibibix ah sidee ayaanu uga aarsanaa, faldanbiyeedkii uu galayna uga gudnaa?

Raggu iskuma jiree Birre aad iyo aad ayuu u gadoodsan yahay. Waxa uu kusoo celceliyaa "Uurjeex miyaa maanta lix (6) dhudhun iga hoseeya! Good miyaa weli nool! *Maradayda nin kuma jiro* midda aan gaysto haddii aan mar dhagaha faraha la galinin." Gaal-eri oo ahaa da'da Uurjeex ka yar oo ag jiifay kolkii masku qaniinayey cadhadii ayuuba la xanuunsaday. Dhawr jeer ayaa la isku duway oo uu yaasiimay Aw Qablax Oogle oo ka mid ahaa wadaadada Yaasiinka ugu akhrin og. Waxaa laga shaki qabay Gaal-eri inay miciyu taabatay. Isna waxa uu caddeeyey in aanu waxba qabin laakiin aanay sinnaba suuragal u ahayn in isaga iyo Good ay ifka wadajoogaan. "*Wiilkii aabbehay ma ahi* haddii aanu Good mar ku muusanaabin 'tani ma ii dambaysayey'" ayuu yidhi isaga oo ugu dambayn abaabulkii iyo heegangalintii beesha dhinaciisa ka wada. Dagaal dabadheeraada oo dalka lagu xoreynayo ayey u qaashaysteen. Kallahaad, guure, kolba 10 nin oo gooni isu taagta, tab iyo tabco dejin ayaa raggii kala dhufsaday.

Intii aanay weli geedkii ka kicin ayaa dhuusoquraar la fadhiyeyi yidhi "Good waxa uu ka dhashay tol laandheere ah, saaxiibbo durba usoo hiilin oo hub iyo xoog badanba lehna waa uu leeyahay ee aynu isdejinno oo la heshiino." Waxa uu sii raaciyey hadal hagoogan oo u eg canaan iyo eedayn ku socota Birre taa oo gundhaceedu ahaa in Birre colaad iyo baas-abuur yahay. Waxaa muuqatay Dabdhul inuu jeclaa inuu kala qaybiyo awoodda reerka, iskana horkeeno Dhamac iyo Birre.

Birre ayaa ku jawaabay "laandheere, hub iyo xoog ayaad sheegtaye haddii uu doono muu ahaado Shiine haysta hubka Maraykanka iyo ka Ruushka oo la isku daray oo ay Yurub oo dhammi taageerayso. Mar daallacuurtaa is uruursatay iyo beeshaydu waa ay kala warheli." Waxa uu sii raaciyey meerisyo xul ah oo uu ka soo qaatay labo (2) gabay kuwaa oo uu go'aankiisa ku adkeeyey, raggiisana ku guubaabinayey. Meerisyadaa waxa uu kasoo xigtay geesiyaal caan ka ah degaankiisa: Cali Oday iyo Nuur-jiir Ibraahim.

- Ninka ladanee laqanbaad ahayd laabta geliyaaba[20]
- Ninkuu malaha laafaalugtuu liidasho u filiye
- Kol hadduu Lillaahida gudboo kaa ladqabo diido
- Libta in aad kasoo qaadatoo lagaddo mooyaane
- Wuxuu tiisii kaga laabmo oo liiliyaan jirine

- Ha la lumee lafihii gaag noqdaa magac ku noolaane
- Cabdi Ladan kobtuu laaci waa inuu ka laabtaaye
- Shantii kibirka layliga u galay waranka leefsiiya
- Lix meeshaad ku joogtaan dagaal laabta ka ogaada
- Haddii luqunta kore laydin jaro lugaha meermeersha
- Luxdanaanta kama soo hadhee laliya duulaanka
- Lalabaha sidaad ugu waddaan laba jibbaar geeya.

Waxa uu Birre hadalkii ku ebyey labo (2) meeris:

- Badnidooda mooyee haddaan baad la iga siinin[21]
- Billaahaan ku dhaartaye inaan balaladaa jiidhi.

Ninkaa Birre jikraaray ee Dabdhul la odhan jiray waxaa loo arkay nin garasho saawir ah goobta la yimid, afkaar shisheeye ku raran, waddaniyadna caddaysimo ka ah. Odayaashu waa ay kohdeen hadalkiisa. Dhamac oo ahaa nin dhinaca san wax ka eega dadkana u cudurdaara ayaaba u fahmay in ninku fulay taxadar badan yahay. Birre waxa uu tuhunsanaa in Dabdhul xoogaa sandareero ah la siiyey. Waxaa niyaddiisa kusoo degdegay meeris gabay ah oo ahaa: "Macno ma leh adduunyada ninkay soori malagtaaye."[22] Muddo gaaban ka dib, Dabdhul meel Alla meel uu jaan iyo cidhib dhigay waa la waayey.

Duuduub ahaan, beesha Birre waxa ay u ekayd mid ujeeddo-wadaag ah laakiin aan arrin-wadaag ahayn, is jecel oo isku dan ah laakiin aan inta badan dhinac isu raacin.

[20] Gabayga meerisyadaasi ku jiraan waxaa tiriyey Cali Oday (AUN).
[21] Geesi dagaalyahan ahaa oo Nuur-jiir Ibraahin (AUN) la odhan jiray ayaa gabayga meerisyadaasi ku jiraan tiriyey.
[22] Gabayga meeriskaasi ku jiro waxaa tiriyey Xasan Cabdi Cumar Ileey oo Dharbaaxo Jin ku magacdheer.

*Col isu gibillo weyn e* Good qudhiisu mid baraad la' ma ahayn. Waxaa oo isdiyaarin ahi marka ay dhinaca kale ka socoto, digtoonaan iyo hub uruursi aan qarsoonayn ayuu waday. Awowgii oo aad u cimriyey oo uu nolol kusoo gaadhay ayaa ku anqariyey in *bah Xaawo ay dhagarqabeyaal yihiin,* oo aan kolla la aamini karin. Mar uu jeclaystay inuu gabanka ragga kala baro ayaa waxaa uu yidhi:

Inan-raggeed marka uu yaryahay ee uu gurguurad baradka yahay waa saddex (3) nooc. Nooc waliba shay gooni ah ayuu cunaa:

1. Ciidda ayuu cunaa;
2. Dabka ayuu cunaa;
3. Qashinka ayuu cunaa.

Carruurtu inay ciidda cunto ceeb ma aha, hooyaduna aad isaguma lurto ka ilaalintooda. "Naa wiilka ciidda ka celiya" ayaa laga yaabaa in aad marar maqasho.

Ciid-cune markii uu hanaqaado waa ninka la yidhaahdo hebel kama maaranno ee inoo geeya. Beeldaajiye deggan oo ciddii mudataba ay mahadiso ayuu noqdaa.

Midka dabka cuna dhuxul nool, mid dantay, ruumad ama danbas wax Alla wixii gacantiisu ay gaadho ee dab saaweeya afka ayuu galiyaa. Sidaa awgeed, hooyo aad ayey ugu dadaashaa in aan gabanku ka gubanin. Ninkaasi qaangaadhka ka dib waa ninka la yidhaahdo "hebel dil iyo deynba waa uu leeyahay."

Awgii qashinka cuni jiray hooyadii dumarka kale lama murmi karto. Guriga dhexdiisa ayey ku oydaa oo ay ugu maydhmaydhaa. Markii uu koro ninkaasi waxa uu noqdaa diradiraale, tuug ama beenaale.

Saddexda nin mid waliba wixii kolkii uu yaraa uu cuni jiray ayuu ku fadhiyaa. Marka ay gaashaanqaadaan waxa ay u sii kala baxaan todoba (7) jaad:

1. Fariid: Diric. Nin karti iyo garasho badan;
2. Dabdhac: Nin geesinimo iyo raganimo isku darsaday;[23]
3. Warac: Geesi raganimo leh oo aad u dhawrsoon, xumahana iska ilaaliya;[24]
4. Faajeer: Dhabcaal, muudal ama bakhayl aan xilkas ahayn oo aan garasho iyo garaacasho midna lahayn;
5. Qundul: Laga-roone wax loogu xisho aan lahayn[25];

[23] Cabdullaahi-dhoodaan waa kii lahaa: "Maansada dhulkii daraf-ka-daraf Yuusuf kaga daalay; Dabdhac geesinimo loo qiraa waa intuu dego e; Geerina dadkeenaa ma jiro ruux ka didayaaye…" Gabay Daba la' la yidhaahdo oo uu 1976kii tiriyey ayey meerisyadaasi ku jiraan.
[24] Gabayga caanka ah ee Isweydiin la baxay ee uu Cabdullaahi-dhoodaan 1973kii mariyey waxaa ku jiray: "Fariid waraca hoos yaa u dilay ama wareenteeyey; Waqii sidii Kamaaludiinna yaa wabarada u laayey."

6. Udub-xujo: xakamariwaa aan waxba ku fiicnayn; suqul aan dhinacna kaaga degayn; iyo
7. Anna-waykan: Isqor, dadka kale uun ku dayda oo aan halabuur iyo han toona lahayn.

Saddexda hore rag wax-gala-waxna-guda weeye, afarta dambase wax wanaag ah oo aad ka abdaysataa yaanu jirin. Ninka kolkii uu yaraa ciidda cuni jiray iyo ka dabka cuni jirayba saddexda hore midkood ayey noqdaan.

Good sheekadaa awowgii u sheegay ayuu si wacan u xusuustaa sidaa awgeed feejignaan iyo xeeladaysi joogta ah oo xog-ogaalnimo ku dhisan ayaa laga dareemay. Mid isu soo jeeda oo og dadka iyo dhagartooda, waardiye joogta ahna iska haya ayuu ahaa. Waxa uu aaminsanaa *dad iyo duurba wax aadan filaynin ayaa kaaga soo baxa*, waxa uuna mar walba gurbaysta beeshiisa xusuusin jiray in aan inan-rag la saadaalin karin.

**Gacanqaadkii Birre**

Birre waa kii goostay inuu Good madaxa rujiyo. Waa kii gudunta xiiraysa qaatay isaga oo fursad gaad ah. Waayuhu kala duwan, xilliguna waa is guraaye iyada oo weli la kala irdhaysan yahay ayuu maalin dambe Good is yar ilaaway. Geed weyn oo qudhac ah oo sabada ceelka ku yaalla hooskiisa ayuu ku gam'ay. Xidid kuusan oo kor usoo yara baxay ayuu barkaday. Halkii isaga oo wadhan ayaa waxaa arkay Birre oo guduntii garabka ku sita. Fursad qaali ah oo aan mar kale soo maraynin inuu haysto ayuu u qaatay. Waa uu soo caga-dhigtay. Suulasha waxa uu ku soo istaagaba Good oo khuurinaya ayuu dul yimid isaga oo guduntii midigaysan. *Mas madaxa ayaa laga dilaaye* waa uu isula baaciyey si uu mar kali ah madaxa u fujiyo.

Good san ma laha, waxaase uu leeyahay saddex dareemayaal oo uu aad ugu tiirsan yahay. Kuwaasi waa urta, taabashada iyo dareenka kulaylka. Haddii uu soo jeedo waxa uu wax ku uriyaa carrabka. Si boobsiis ah ayuu carrabka usoo bixiyaa, dibna ugu celiyaa si uu hawada u uriyo. Laakiin dareemaha ugu muhiimsan ee uu Good leeyahay waa midka dareensiiya kulaylka iyo dhaqdhaqaaqa noolaha kale. Dareemahani waxa uu u sahlaa inuu ugaadhsado, kana badbaado wixii isaga ugaadhsanaya. Isha kulaylka ayuu abbaaraa si uu u qabsado xayawaanka iyo xasharaadka uu calfado. Dhaqdhaqaaqa dhulka, ciidda, caleenta iyo xaabka kale ee daadsan ayuu ka fahmaa fogaanta iyo jihada calafka ama cadowgu ka jiro. Sidaa awgeed, in kasta oo uu hurday haddana feejignaan Alle u dhaliyey oo ay dareemayaashaasi u sahleen ayuu lahaa. Waxaa kale oo xusuustiisa summad ku noqday dardaarankii awowgii.

Good guduntii waa uu u gooyey. Gas iyo farma' ayuu is raaciyey. Waxa uu Birre guduntii qabadsiiyey xididkii uu Good barkanaa. Wacadee waa baxsaday ayaa Birre soo dhaaftay. *Nin sigtay ma noola!* Good cagaha ayuu wax ka dayey. Isaga oo sii ganan ayuu sidii kobraha madaxa kor u qaaday oo dib soo jalleecay. Mise ninka maanta usoo qalabqaatay inuu kurka garabdhigo waa nin ka mid ah raggii ay axdiga lahaayeen. Axdigu xaggee joogaa! Waa been iyo

[25] Maxamuud Axmed Cal Bidhiidh waa kii lahaa: "Qundul iyo qawaar naac iska leh ama qadduuc waashay; Quruun sheexi waydiyo hadday qeyro saa noqotay; Qorrax soo bixii xero qolqola awr qandici raamsi; Ratibaabad hilib uu qashiyo quud ka barideene."

dhalanteed uu isagu iskii isaga dhaadhiciyey oo kusoo celceliyey dabadeed run la noqotay. Wacad Alla ku qabay! Wallee in aadan mahadin doonin ayuu soo tuuray. Raad weyn ayey guduntu xididkii ku reebtay. Goodna isaga oo anfariirsan ayuu ceelkii guntiisa kasoo todhiyey.

Birre waxa uu tuhmay in Good is gama'suurinayey ee aanu basar u hurdin maxaa yeelay aad iyo aad ayuu usoo shanqadhtirtay. Mar labaad ayey Birre talo ku ciirtay. Uurjeex waa mayti, gacanqaadkiisiina waa fashilmay. Talo faro-ka-haadday, colaadiina hadda ayey si hor leh cirka isagu shareertay.

Dhawr toddobaad ayuu mid waliba ka kale ilaalada ka meeriyey. Xasiloonidarro weyn ayaa degaankii hadhaysay, qolo walbana gurmad iyo taakulo wixii ay heli kartay ayey jirisay. Waxaase jiray qayb bulshada ka mid ah oo maslaxo iyo nabadayn isku hawlay.

**Guddi iyo gorfeyn**

Geedkii raggu fadhiisan jiray ayuu maalin dambe Birre soo kadaloobsaday. Talo ayaa la gudboon, xaggeese wax ka bilaabaa. Allow ur u bixi! Wax yar kadibba waxaa kusoo biiray Dhamac oo cadho la ildaran. Iyaga oo aan isla hadlaynin, mid waliba iskii isagu buuqsan yahay oo dhulka jeexjeexayo ayaa waxaa kusoo baxay labo nin oo aad u laxaadsanaya. Waxa ay u ekaayeen niman dhiillaysan. In kasta oo ay is garabsocdeen, tallaabadana si fiican isula helayeen, haddana islama aanay hadlaynin. Dareen korosho leh ayaa ku dhashay Dhamac iyo Birre. Tollow waa kuwama, maxayse u socdaan?

Nimanku waxa ay kala ahaayeen Muuse-halaq iyo Rukun Mas-ciideed. Waa labo (2) nin oo beelaha dhexdooda magac iyo maamuus ku leh. Kulankooda iyo imaatinka ay Dhamac iyo Birre u yimaadeen kama' iyo kadiso midna ma ahayn. Maag ayuu ahaa. Waxa ay isu haysteen kollayba haddii xamaarato lala xaajoonayo, geyiga nooga guur la leeyahay ama mag la weydiisanayo cid iyaga arrintaa uga faradhuudhuuban in aanay jirin. Muuse iyo Rukun waxa ay Dhamac iyo Birre ogeysiiyeen in ay maslaxaddoon yihiin ayna jecel yihiin in ay labada beelood heshiisiiyaan. Waxa ay yidhaahdeen "wixii dhici lahaayi waa uu dhacay, dibna saacadda looma celin karo ee aynu hadda heshiis iyo nabadayn baadigoobno."

Dhamac iyo Birre si mug leh ayey u dhuuxeen hadalkii Muuse iyo Rukun laakiin taladoodii halhaleel uma aanay ogolaanin. Gaar ahaan Birre inuu aarguto oo mar la maqlo isaga iyo Good halka ay isla mareen ayaa ka go'nayd. Dood dheer ka dib, Dhamac iyo Birre waxa ay soo istaageen "waxba yaanu Good mag na siinin oo Uurjeex aanuba ka samirnee, Good iyo beeshiisuba degaankanaga ha ka guureen oo yaanaan il dambe saarin."

Muuse iyo Rukun waxa ay ka warhayeen in Good uu yahay nin kibir tadhahay oo aan si dhib yar ku aqbalaynin guur. Isaga iyo beeshiisuba waa ay halaaqeen, *dhurwaa la tag bartayna ka dhigistu waa ku ceeb*. Waxa ay is hayaanse waa rag tiirri ah. Sakal adag ayey taladii gashay, jawaabta Good kasoo noqondoontana waa la odorosi karay.

Muuse iyo Rukun ayaa si maandhugad ah hadal kale usoo celiyey. Waxa ay yidhaahdeen "Dhamac iyo Birrow, go'aan aan ahayn in Good iyo beeshiisu guuraan oo aad ku qancaysaan ma jiraa?" Dhamac oo sida kor ku xusan hibo hadal lahaa, qabayna in aanu jirin san-ku-neefle ka garheli kara ayaa hadalkii boobay. Waxa uu yidhi *"habeenkii xalay ahaa ee tegay miyuu soo noqon?"* Birre oo aanba sugin waxa ay Muuse iyo Rukun ku jawaabi doonaan ayaa isna si cadho ku jirto u raaciyey *"calaacashaa miyey timo kasoo bixi?"* Mar kali ah ayey Dhamac iyo Birre yidhaahdeen "waa maya" iyaga oo isu jawaabaya muujinayana in aan Muuse iyo Rukun wax jawaab ah laga sugaynin.

Muuse iyo Rukun iyaga oo aan rajo fiican qabin laakiin aan quus ahayn ayey u tageen labo (2) oday oo xamaaratada degaankan hormuudkeeda ku jiray. Waxa ay kala ahaayeen Abris iyo Jilbis. Waxaa la fadhiyey oo ay sheekaysanayeen Abeeso iyo Subxaayo. Muuse iyo Rukun arrintii ay u socdeen ayey halaqii goobta fadhiyey hordhigeen. Abeeso iyo Subxaayo ayaa hadalkii dafay. Iyaga oo aan muhiimad weynba siinaynin horfadhiga ay odayaasha horfadhiyaan ayey isu iljabiyeen. Ilbiriqsiba kama aanay fakarin. Si aad mooddo in ay ogaayeen nimanku hawsha ay u socdaan kana soo tashadeen ayey u diideen in ay ergada wax ka galaan. Abeeso waxa ay tidhi dadka waxaan ku nacay labo (2) arrimood. Gardarrada[26] iyo maahmaah xumada.[27] Subxaayana waxa ay tidhi anigu mici iyo mariid midna ma lehi, aabiga ilma Aadanna waad og tihiin. Dakano iyo eed aanan qaadi karin in aan galo ma doonayo. Labadoodiiba waxa ay hadalkii kusoo gaabiyeen in aanay ninkan gudunta la gagabaya iyo Good dhexgali karin.

Dooddii ayaa dheeraatay, waana la is afdhaafay. Halaqii goobta sida nabadgelyada ah u fadhiyey ayaaba dhawr goor ku sigtay in qudhoodu ay maryo dhiig leh kala furtaan. Kol dambe ayuu Jilbis soo jeediyey in loo faqdaayo, odayaashuna ay berri xilligan oo kale soo noqdaan.

Afartii halaq aad ayey u doodeen. Kolkii ay isku daaleen, Abeeso iyo Subxaayana dhinacooda dhulka la dhigi waayey ayuu Jilbis soo jeediyey in hawsha Abris iyo isaga faraha looga qaado. Sawaxan iyo faro-isku-taagtaag waxba tari maayaan, arrintuna dhiraandhirin iyo in dhinacyo badan laga eego ayey u baahan tahay ayuu sii raaciyey. Intaa markii ay maqashay Subxaayo fadhigiiba waa ay ka kacday. Si aan kalsooniyi ka muuqanin ayey u dhaqaaqday. "Innagii faqaynay miyaa sii kala faqayna? *Faqse fagaaruu ku dambeeyaa*. Qoodhay iyo xeraday iyo xiniintay in aanan wax addimo ku socda iyo wax baalal ku duula midna aaminaynin" ayey halgaad ahaan usoo tuurtay.

Hadalkaa intiisa dambe ayaa Subxaayo lagu qabsaday. Waxaa lagu eedeeyey in ay baalley ama haad oo aan sheekadaba ku jirin afka la gashay, dagaalkiina gaadhsiisay. Subxaayo arrintaa

[26] Abeesada iyo murtida ku timaadda waxaa si faahfaahsan uga sheekeeyey Axmed Faarax Cali (Idaajaa) iyo buuggiisa Murtida Maahmaahda Soomaalida (2005). Abeesadu waxba ma qaniinto haddii aan dubkeeda iyo dub kale is taabanin. Sunteeda iyo eelka daran ee ay reebto awgeed, dadku indhaha haddii ay ka qaadaanba waa ay dilaan. Ul, qori iyo dhagax kolba wixii la heli karo ayaa lagu dawdabiyaa ilaa ay naftu dayso. Laakiin abeeso colaadda iyada iyo dadka ka dhexaysa waxa ay u aragtaa mid dadku wado kuna gardaran yahay, iyaduna ay dulmane tahay.

[27] Maahmaahaha abeeso lagu nabo laakiin aanay jeclayn waxaa ka mid ah: Abeeso dhul u eki ayey wax ku dishaa; wadaadna dad u eki; Markaan aadane dayona aarso ayaan idhaahdaa, markaan Eebbe dayona aayarso ayaan idhaahdaa; Iyo lix jir kii aan ku qaniino, lixdan jir ayuu ku dhintaa.

kama aanay garaabin maxaa yeelay xusuusteeda haadda ayaa ka cadowsan dadka. Waxa ay goobjoog u ahayd ehel badan oo keed ah oo hawl yaraan dhulka iska mulacyeynaya oo uu dhufsaday gorgor meel Alla meel uu ka yimid aan la aqoon. Abris ayaa hadal qoorgooyo ah ku tuuray. Waxa uu yidhi "saddexdaa aad ku dhaaratay midna ma lihid ee Subxaayo dhinac noo dhaaf." Subxaayo oo jeclayd in aan hadalka looga dambaynin ayaa intii aanay libdhin tidhi "*weli waxaa dabada la hayaa wixii deero dalka ka geeyey."* Waxa ay tuhuntay in aan martabaddeedii la dhigin aadna loo yasayo. Waxa ay la ahayd in *waxbayahay* loo arko mar haddii aanay wax qaniini karin.

Yaan lagu dagin ayaa hadalka Subxaayo ka dhadhamaysay. Subxaayo haba is yar dharriijiso laakiin waxa ay ahayd gabay dhaadhi macruuf ah, waxa ayna ku jirtay kuwa halaqa ugu horreeya xagga gabay xulka iyo murti xambaarka. Sidaa awgeed waxa ay dooddeedii ku xidhay meerisyo habboon oo ay kasoo dheegatay gabaygii la baxay Dhiidhaa ee uu 1974kii Cabdi Wali Sheekh Biixi (AUN) tiriyey:

- Dhadaanbiyaha jiirka iyo bisado dheri wadaagooda
- Dhexdhexaadi moogaha la yidhi dhaalkana u qeybi
- Dhoorka unbaa ku daaliye heshiis waa ka dheeryahaye.

Iyada oo kolba dhinac isu dhufanaysa oo wajiga kaduudaysa, una haysata in aanay sina suuragal u ahayn in Dhamac iyo Good la heshiisiiyo ayaa barbaraheeda meel dheer laga arkayey.

Abeeso illeen iyadu orod ma taqaano e halkeedii ayey ku nagayd. Waxa ay tidhi "ilma madoobow (Abris iyo Jilbis) waabaayadiina ayaad isku hallaynaysaan, laakiin waxa aan idinkula talinayaa in aydaan tolkiin meel xun u hoggaaminin. Abris ayey waliba si gooni ah u faquuqday oo waxa ay tidhi "Aw Gaab, adigu laba afle ayaad tahay oo halaqa kale la mid ma tihid." Waxa ay ujeedday Abriska in aan suntiisa laga kicin waxaa u dheer afka iyo sayntaba wax buu ku qaniinaa. Laakiin hadalkaa Abris aad ayuu u dhibsaday. Waxa uu u qaatay in Abeeso ay ku eedaynayso laba-wajiilenimo. Abeeso iyada oo madax weyn, neef xoog leh tuuraysa oo midabbaynaysa ayey gudub u dhaqaaqday. "Wallee aniga qof ilma Aadan iga yaqaanna in aanu bogga dhulka dhigin" ayey kusii tiraabaysay iyada oo cadho iyo qaadan-waa wajigeeda uu ka muuqdo. Sidaa oo ay tahay haddana waxa ay ku kalsoonayd in aanay iyada iyo Subxaayo isku heer ahayn, halaquna aanu kollaba ka maarmi doonin.

Guddigii is xilqaamay hawshii aad ayey ugu rafteen, dhawr goorna waa ay kala ufoodeen. Guddi hoosaad iyo mid farsamo aan dhammaad lahayn ayey kolba qabtaan. Waa ay isku gawso-beeleen, hagardaamo iyo eex la'aanse ma ahayn. Kol dambe ayey labadii dhinac isu keeneen.

Beeshii degaanka lahayd waxaa ka yimid Dhamac, Gafdiid iyo Birre. Labada hore waxaa lagu soo xulay maslaxad jacayl, waayo-aragnimo iyo odaytinimo. Birre waa lagu qasbanaa inuu goobjoob ahaado maxaa yeelay la'aantii heshiis Good lala galo in aanu meel gaadhaynin ayaa caddayd. Sidaa haba ahaato, laakiin saddexda nin iyo guud ahaan beesha Dhamacba xidhiidh-

tacabka iyo xolxolaysiga siyaasadaysan waa laga badiyey. Niman dagaalka iyo gacan-ka-hadalka ku daran asii siyaasaddu ku cusub tahay ayey ahaayeen.

Beesha kale waxaa ka yimid Good, Abeeso iyo Jabis. Abeeso aqoon iyo la dhaqan ay dadka aad ula dhaqantay oo ay halaqa kale dheertahay ayaa loo doorbiday. In kasta oo ay judhii hore diidday in ay wadahadalka qayb ka noqoto, Good ayaa aad ugu calaacalay kuna qanciyey in arrintu ay xiniiyo taabad tahay, mid loo kala hadhi karana aaanay ahayn. Jabis nafteeda haddii uu gacanqaad yimaaddo in aan halaqu ka maarmaynin ayey is tuseen maxaa yeelay xoog iyo laxaad balaadhan ayey leedahay. Goodna waa hogaamiyaha reerka oo sinaba loogama tagi karin.

Waxaa la gartay nooleha kale ee degaanka wax ka dega in qaar looga yeedho. Haadda waxaa looga yeedhay gorgor, galaydh iyo goroyo. Dugaaga waxaa ka yimid dhidar, dawaco iyo shabeel. Ugaadha waxaa ka yimid goodir, dabataag iyo sagaaro. Saangur[28] kol ay ku tahay martiqaad ayaa loo diray, waase ay diidday inay kulanka timaaddo. Waxaa la tuhmay inay halaqa goobta isugu yimid ka baqday.

Xoolaha ama nimcoolayda cidna loogama yeedhin maxaa yeelay waxaa loo haystay in ay yihiin wax aan damac lahayn, dantooda aan aqoon, dadkuna sidii uu doono ka yeelo.

Kuwan dambe dhammaantood waa uun goobjoogayaal ee wax talo iyo go’aan ah midna shirka kuma aanay lahayn.

Diin ayaa la tabay, Dhamac ayaase ku adkaystay in aanu diin shirka iman karin isaga oo hawlo gaar ah ka dabaakhtamaya. Waxa uu yidhi “diinku xaggee xisaabsan yahay? Halaq, haad, ugaadh, dugaag iyo dad midna ma aha. Kaaga darane, nin maandaayo qaba oo aan naflayda kala duwan ee goobta isagu timid la jaanqaadi karin weeye. Maxaa laga dheefayaa imaatinkiisa?” Su’aalo badan oo ujeedkoodu yahay calbabaas uu doonayo inuu ku rido diin iyo ka qeybgalkiisa shirka ayuu Dhamac soo hurgufay. Diinna nin in loo yeedho danaynayaba ma ahayn. Doogga ayuu dhib yaraan iska daaqayey. Muranka iyo isqabqabsiga in laga maarmi karo ayuu u arkayey. “Dhulka calaf lagama waayin ee nimanku faduul iyo khilaaf jacayl ayey isu xagxaganayaan” ayaa dhawr jeer laga maqlay.

Arrini waxa ay soo farandulaysaba, labadii dhinac ayaa isa soo hor fadhiistay. Shib. Hadal iyo nuuxsi midna ma leha. Afka ayaa la isu wada tuurayaa. Ragga qaarkii neefsigooda ayaa si bayaan ah loo maqlayey. Markii uu aamuskii yara dheeraaday, qaabkuna mid yara sirgaxan u ekaaday ayaa nin raggii goobta fadhiyey ka mid ah laakiin aan guddiga ku jirin hadalkii furay. Ookow Tuurre waxa uu soo jeediyey “war colaaddu idin baabi’isaye is cafiya. Mag kala qaata oo xeer dad, dugaag ama duurjoog kolba kaad ku qanacdaan ku kala baxa, ceelka iyo calafkana ku wada noolaada.”

[28] Saangur; soongur ama gabsas. Nafley itaal yar, dhogor leh oo dabagaalleha u eg.

Intaa markii la maqlay ayaa dhawr ruux isku mar hadleen, qof hadalkiisa basar loo maqlayse ma jirin. Dhawr nin ayaa mid waliba jumladdii uu markaa carrabka ku hayey ay ku kala go'day. Shirkii salaw ayaa ku dhashay. Dabadeed Good ayaa hadalkii la booday. Waxa uu codsaday in Birre la warsado sababta ku kalliftay in heshiiskii ay galeen uu ka baxo. Su'aashaa Dhamac, Gafdiid iyo Birre waa ay ku wareereen. Birre oo ragga goobta fadhiya ugu af adkaa ayaa yidhi "heshiiskee? Goorma ayeynu heshiinay tuugyahow beenaaleha iyo damaaciga ah?!" Kolkaa ayuu Good hadal dheer oo is difaac iyo indhacadays u badan galay. Waxaa ka mid ahaa "mar i dage Alle ha dago, mar labaad i dagase aniga ayaa is dagay. Birrow nin la aamini karo ma tihid, ballan iyo axdi toonana ma lihid ee ina kala jiid. Anigu ninka ballantii hore ka baxay ma ahi. Ninka khaa'inka ahi waa adiga. Waxa uu sii raaciyey oo uu doodiisii gurracnayd ku badhigantaalay meerisyo gabay ah oo uu qaarkood gabayxayiray, qaarna sidii asalka ahayd usoo xigtay:

- Weligaa dakano kaa fog baad duub u xidhataaye[29]
- Dadkuna haatan waa yaabban yahay daqaqankaagiiye
- Danina kuuma geynine adaa doonta eedaha e.[30]

Ninkii uu wiilkiisa dilay, ceelkiisii iyo degaankiisii ka irdheeyey ayuu ku leeyahay "Danina kuuma geynine adaa doonta eedaha e." Isaga oo hadalkii dawdhaafka ahaa sii wada ayaa waxa uu yidhi "Sir ma qabe Alle ayaa u sahan ah, waanan ka badbaaday dhagartiinii."

Abris kuma aanu farxin mowqifkaa adag ee uu Good qaatay. Waxa uu si yara gunuunuc ah u yidhi "wax tagey tiigsimaad ma leh ee timaadada aynu xoogga saarno." Good oo aad u cadhaysan ayaa indhaha ku gubay. Waxa uu yidhi "wallee wixii abeeso kugu sheegaysay ayaa kaa soo mudhbaxay. Wajigaaga haadi ku falaadday, damiir-laawehiiyow." Haaddii goobta joogtay ayaa mar kali ah ganafka wada taagtay. Qaarkood baalasha ayey isku garaaceen jimotuurad ahaan. Haaddu waxa ay ka cadhootay in si aan munaasab ahayn mar labaad loo soo hadalqaaday. Laakiin boolaxoofto mooyee af iyo addin midna wax dhanqaryo ah ma aanay gaysan.

Abris laabta ayuu ka hadlay. Waxa uu isu haystay in aanu waxna dhibin waxna dhaafin. Dadaalkiisii badnaa in hanjabaad, cagajuglayn iyo tuhun loogu baddelo ayuu qaadan waayey. Waxaase uu doodiisii kusoo koobay meerisyo uu kasoo xigtay gabay ka mid ah gabayadii badnaa ee Sayid Maxamed Cabdille Xasan (AUN):

- Shir aguugay wayeel abyamay talo ashaaddowday
- Irda jiqa albaabo isku xidhan eel la bixin waayey
- Xaajadaas afraha duubatee loo olmami waayey
- Nin aqoon leh aw iyo haddii odayo loo doono
- In kastoo ayaan iyo ayaan lagu aloollaado
- Ninkii maalintaa ka arrinshaa aaqil saw ma ha?

[29] Good meerisyadaa waxa uu kasoo ergistay gabay uu tiriyey Cismaan Baxnaan (AUN).
[30] Axmed Faarax Cali Idaajaa (2005.) Murtida Maahmaahda Soomaalida.

Waa uu yahay ayuu isagu jawaabay.

Abris karti dhif ah nin leh asii la fahmi waayey ayuu isu haystay. In kasta oo aanu goobtii ka sheegin waxaa kale oo laabtiisa ku wareegayey laba meeris oo ku jiray gabay kale oo uu Cabdullaahi-dhoodaan leeyahay, kuwaa oo ahaa:

- Bulshadii abuurtee colaad baaji laga waayey[31]
- Isbariinta diiddee cidday buurato aan dhawrno.

Colaad aan waxba hambaynin oo dad, dal iyo duunyaba galaafata nin degaanka ka hortaagan lase fahmi waayey inuu yahay ayuu Abris si dhab ah u aaminsanaa. Jilbis ayaase afka usoo dhaweeyey. Jilbis waxaa ashqaraar ku riday sida fooshaxun ee Abris iyo gudigaba loola dhaqmay. Waxa uu dhagta ugu sheegay:

- Wakiil aan soconaynin[32]
- Waa wadaan xadhig wayday
- Walaalo aan is maqlayninna
- Wadhi baa la yidhaa
- Meeshii wax laga wadana
- Waylo dhale dameeruhu.

Waana uu kacay.

Birre dacwiga Good aad ayuu uga xumaaday. Isaga oo Ilaahay noolaha kale oo dhan ka sare mariyey in mas dhulka xamaarta sidaa ula hadlo ayuu qaadan waayey. Guddigii meesha fadhiyey oo uu u qaatay in aanay daacad ahayn ayuu hiifay oo haaraamay. Laakiin talo faro uguma jirto, labada dhinacna isaga ayaa hadda mus jilicsan. Walbahaar ayaa ku baraaqsaday oo wixii caddaan lagu yaqaanay waxa uu noqday gibil madow. Ninse isdhiibay ama rumaysan in laga adkaaday uma ekayn. Hubaashii waxa uu aaminsanaa kol ay noqotaba inuu ku biyokeeni doono Good iyo beeshiisa. Toolmoon Tahar oo ahayd Birre hooyadii waxa ay dhallaannimadiisii ku koolkoolin jirtay “hooyo libinsidow.” Kol ay noqotaba inuu libintaa keeni doono ayuu ku laabriixday.

Mar haddii Good maslaxaddii iyo nabadayntii diiday, qofka gardarada iyo doolaaladhaafka wadana uu isaga yahay, Birre waxa uu isu diyaariyey halgan dabadheeraada. Waxa uu ku qancay in aan Good *orod* iyo *addin* midna lagaga baxsan karin ee ay tahay uun in dagaal dhuubka loo daro.

Waxa uu kusoo celceliyey hadalkiisii hore isaga oo leh “Goodow gafka iyo gardaradaba adiga ayaa leh, wiilkaygii aad dishayna waa cafis ee degaankayga iiga guur oo ku noqo halkii aad ka

[31] Meerisyadaasi waxa ay ku jiraan gabay Xuuraabab la yidhaahdo oo uu Cabdullaahi-dhoodaan 1980aadkii tiriyey.
[32] Meerisyadaasi waxa ay ka mid ahaayeen jiifto badan oo uu tiriyey Maxamuud Cabdullaahi Ciise Singub (AUN), waxa ayna ku jireen riwaayaddii Isuma Qaddo.

timid.  Sidaa oo kali ah ayeynu ku kala nabadgalaynaa."  Good arrintaa waa la marin waayey. Waxa uu u dhaqmayey sidii nin guul ku fadhiya, hadda Birre ka tugtugroon, wax dan ah oo heshiis iyo guuritaan ugu jirana aanay jirin.

"Gardarro garab og; gardarro garab og; wallee guuldarro iyo hoog ayaa kuu dambeeya" ayuu si isdabajoog ah dhawr jeer Birre u yidhi.  Waxaa kale oo laabtiisa ka hugmay meerisyo ku jiray gabay uu mariyey Cabdullaahi-dhoodaan oo ahaa:

- Ragse hadduu qulqulad kaa badshoo quudhsi kugu raago[33]
- Qardabiyo xumaatiyo haddii qadaf laguu gaysto
- Qandhuufada yaryari boogahay qolofta kuu yeeshay
- Kuma wada qalaadeen haddaad mar is qaniintaane.

Meerisyadaasi waa dagaalgalin buuxda oo ku wajahan jiilalka soo socda ee Birre iyo raggiisa baddeli doona.  Kuwaa tollow adigu, akhristow, ma ku jirtaa?

Intaa raggu kolba gabay ama maanso kale soo dhufanayo Dhamac wali mar kali ah tix ma soo qaadanin.  Hadal aan koomaal u baahnayn nin odhan kara ayuu ahaa, markanse sidii nin hadda hurdo kasoo baraarugay ayuu lasoo booday gabaygii caanka ahaa ee Cabdullaahi-dhoodaan ee Garadarro la magacbaxay.  Waxaa xusuusiyey weedhaa sare ee uu Birre ku celceliyey.  Waxa uu cod dheer oo qurux badan oo aad ugu eg kii Dhoodaan ku yidhi:

- Gardarrooy waxbaad geysataa goor iyo ayaane[34]
- Gafkii aad samaysaa batiyo godobahaagiiye
- Gashi[35] aan yarayn baad qabtaa jeer lagaa gudo e
- Waxaad goyso moyee lawaa nimaad gargaartaaye
- Gurigii barwaaqaysan baad gubi taqaanaaye
- Oo ruuxaad gadhqaaddaa wallee guul ma xoogsado e
- Adiga iyo geeridu dadkii waad gablamiseene.

Halkaa markii uu marinayo ayuu gartay in gabaygu aad u dheeryahay aanuna fadhigan ku wada marin karin.  Kolkaa ayuu yidhi "waa inoo goor iyo gole kale iyo Gardarro."

Good ayaa jawaabay.  Waxa uu yidhi:

"Weligiinba gabya. Birrow inta wiilkaaga xabaashiisu kuu muuqato, anna guduntii aad madaxa igu goyn lahayd raadkeedu ii muuqdo, ma heshiin karno. Ina kala kaxee adeer!"

---

[33] Gabayga meerisyadaasi ku jiraan waxaa la yidhaahdaa Qodob waxa uuna gabaygaagu tiriyey hillaadda 1979kii ama 1980kii.
[34] Gardarro waxa uu Dhoodaan tiriyey 1973kii isaga oo Boorame jooga.
[35] Gashi: dayn ama godob qaan ku ah oo aan ka hadhayn.

Halkaa iyada oo ay arrini marayso ayey labo (2) nin oo beesha Dhamac ahi isdileen. Beesha Dhamac maxaad ku taqaanay? Iyadii ayaa dib isugu fooftay. Barbaartii xoogga ahayd ayaa ilqoodhka iska wada eegay, odayaashiina dib-u-heshiisiin iyo dagaal sokeeye baajintii ayey ku mashquuleen. Good iyo cawaamkiina haatan waxa ay u eg yihiin dhex-ku-bari.

**Gunaanad**

Colaad illaa maanta taagan oo cid xal u hesha la waayey ayaa u dhexaysa Dhamac iyo Good. Dhamacse waxa uu aaminsan yahay in duulal kale ay Good ku daaban yihiin, haddii loo kala dhexbaxana uu beri hore ka faraxanlahaa Good iyo ehelkiiba. Waxa uu aad u soo daliishan jiray meerisyo ku jiray gabaygii caanka ahaa ee Samatar Baxnaan (AUN).

- Xasan iyo anoo sida Siciid la i xambaaraayo
- Iyo haatan xaaddii gadhkoo xayga ka caddaatay
- Xabbad iyo dil bay noo ahayd Reer Xirsi Cismaane
- Xashiishka iyo labo Muusena way ku xadfanaayeene
- Xubin keliya Hagar Aadan baa iila xoog badane.

Guurti walba oo arrintan gasha quus ayey la noqotaa, beesha Good ayaana aad loo eedaynayey. Damac iyo dhulbalaadhsi isu fansaaran haba jireene, sababta ugu weyn ee arrintaa xal waara looga gaadhi waayey waa garaadxumo iyo gardarro garab og oo kala shidaal qaatay. Ciriq xumada iyo jiitanka colaaddaa waxaa markhaati u ah meerisyada AUN Cabdullaahi-dhoodaan inoogu tagay:

- Maskii good ahaa iyo ninkii loo garqaadaayey[36]
- Guurtida markii loo wacee taladii loo guulay
- Cid gungaadha xaajada kolkii goobtii laga waayey
- Waxay gocatayoo eersatayoo gabogabo u diidday
- Waa masaartu xidadkay gashiyo gabankay aaseene.

Taladii halkaa ayey duraaqsatay, sheekadii oo dhanna waxa isku fuuqfuuqsaday meerisyadaa Dhoodaan oo si togan farriinta usoo gudbiyey.

Dhaqdhaqaaqii gobonimodoonka ahaa ee uu gadhwadeenadiisa ku jiray sidii uu Dhamac jeclaa uma taabbagalin. Hagardaamo iyo minjoxaabo joogta ah ayuu dhinacyo badan kala kulmay. Waxaaba mar dambe kusoo baxay xujurgaliye miidhan iyo rag garaadkoodu xanniban yahay. Sidaa daraadeed, Dhamac miyiga ayuu ku noqday isaga oo mooggan da' ah oo u haysta in aan noloshiisu raandhiis lahayn mar haddii aanu xor ahayn. Waxa uu ku haasaawaa inuu noqon

[36] Meeriyadaasi waxa ay ku jiraan gabayga caanka ah ee Garnaqsi la yidhaahdo ee uu Cabdullaahi-dhoodaan tiriyey 1974kii isaga oo xilligaa Xamar joogay. Gabaygu waxa uu ku aaddanaa shirkii Ururka Midowga Afrika ee Xamar lagu qabtay sanadkaa, waxa uuna la hadlayey dowladdii Jamhuuriyadda Soomaaliya ka talinaysay iyo reer Soomaali Galbeed. http://www.doollo.com. Gabaygaa oo dhammaystiran iyo sheekooyinkiisuba waxa ay kusoo bixi doonaan buug uu qoraagu dhawaan kasoo saari doono taariikhda iyo maansada Cabdullaahi-dhoodaan.

lahaa abaaldhurad aad loo muuneeyo haddii uu gobonimada hanan lahaa. Kolkii uu arko nin reerkiisa ah oo labbisan ama xarragoonaya waxa uu ku tuuri jiray dhawr meeris oo gabay ah oo uu Cabdullaahi-dhoodaan kasoo ergistay. Waxa uu odhan jiray:

- Is xalxaliddu way fiican tahay la xarragoodaaye[37]
- Marka horese waa in aad xor tahay xeerna leedahaye
- Intuu xabawarkaa yahay adduun ee xiqdigu yaallo
- Haw xilan xariirtoo dhan waa la iska xooraaye
- Dadku inuu xammaashaa ka roon inay xarraamaane.
- Xikmadaha asaageen watee xoogga lagu yeesho
- Rag Allow maxaa naga xayira waa xujiyo yaabe.

Good naftiisu waa uu cimriyey. Waxa uu ku dambeeyey kaligii-taliye, kaligii-cune iyo macangag aan qof kale waxba u oggolayn. Dadkiisii oo ay gaajo baabi'isay ayuu walanqo ruugayey, waxgarad oo dhanna filginka ayuu u taagay. Cid aan isaga ahayn in ay xurmo mudan tahayna ma aanu aaminsanayn. Sidaa daraadeed, xukunkiisii waxaa ku kacay mucaarad daran oo degaanka oo dhan ruxay. Isaga oo aan tabar iyo talo midna haynin, oo goob walba oo uu fadhiisto ka yidhaahda *markii aan tabar hayey talo ma haynin, haatan oo aan talo hayona tabar ma hayo* ayuu geeriyooday. Waxaa la isla dhexmarayey in si hoose loo dilay, dabadeed la uusxabaalay. Mucaaradkii Good iilka la ekaysiiyey qudhiisu ma tisqaadin. Haaweey is wada qalanaysa ayuu ka tagey.

Isku soo wada didiyoo, koolkoolintii shisheeyuhu waa ay qaadhay, beeshii Goodna nolol suququr ah oo aan wax loogu xisho lahayn ayey maanta ku nooshahay.

Birre madixiisu weli waa qoyan yahay. Nin geed-adaygnimo u dhashay weeye oo ma rajodhigin, geylankiina ma daynin. Laxaad iyo laab wadajira isaga oo cuskanaya ayuu hadba mawjad hor leh oo gobonimodoon ah soo kiciyaa in kasta oo laga hiiliyey sidaa daraadeedna uu haatan u eg yahay nin caalsaarihii laga qaatay. Waxaase uu ku laabfayow yahay in guushu gallaba ninley tahay, duniduna ay hadhka labadiisa galin tahay. Mar ay noqotaba in qosolku xaggiisa ku dambayn doono ayuu si aan kalahadh lahayn u aaminsan yahay.

Geylame gafdiid ah iyo gardarro garab ogna waa ay is hayaan.

[37] Meerisyadaasi waxay ay ku jiraan gabay Xulub Socod la yidhaahdo oo uu Cabdullaahi-dhoodaan tiriyey 1973kii isaga oo Xamar kolkaa joogay.

Dhinac walba marka laga istaago, sidii uu Cabdullaahi-dhoodaan Jilboriiq ku sheegay ayaa biyo-kama-dhibcaan ah: "*Rabbigii adduunyada lahaa suu rabay noqon*." Se labadii nin ee beesha Dhamac ka tirsanaa ee is dilay xaaladdoodii iyo wirigwaarigtii ka dhalatay xaggay ku dambaysay?

*Diyaar noqo haddana saadambaan daqaqamaynaaye.*[38]

W/Q Cawaale Xuseen
Email:awalle@gmail.com

[38] Gabaygii Dalxiis Geyn ee Cabdullaahi Macallin Dhoodaan.